



Wixii ku soo kordhay dib-u-dejinta Flemington

- Inta badan dadka kirada ugu jira 12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road waxaa meel fiican u maraya howlaha raritaanka ee la qorsheynayo bisha Sebteembar.
- Qoysaska soo haray waxaa laga sii taageeri doonaa howlaha dib-u-dejinta.



Waxaan halkaan u joognaa inaan ku caawino

Kaalay oo la hadal kooxdeena


Taageerada dib-u-dejinta ee la imaan karo bilaa ballan:
10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo Talaado iyo Khamiis kasta

Xarunta dib-u-dejinta
33 Alfred Street
North Melbourne



Jadwalka dib-u-dejinta

12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road




In wax kasta la idinla soo socodsiiyo

- Kulamada la isku xog wareysanayo**
- Ra'yigii nalagula wadaagay kulamadii wadatashiga**
- Isdiwaangeli si aad ula socoto wixii soo cusboonaado**

Si aad wax kasta ula socoto booqo:



homes.vic.gov.au/flemington-precinct



nagala soco baraha bulshada raadi
Homes Victoria



BIG HOUSING BUILD

Wixii kusoo cusboonaaday Bulshada **Flemington**

Waxa ka socda goobta

Taageerada loogu talagalay dadka kirada ugu jira guryaha ee dib-u-dejinta loo sameynayo

Inta badan kiraystayaasha way guureen oo Homes Victoria waxay wali taageertaa kiraystayaasha hadhay.

Mukeefyo cusub

Howlo shaqo oo korontada ah ayaa waxaa laga hayaa 126 iyo 130 Racecourse Road si ay taasi u taageerto mukeyfyada cusub sanadka 2026.

Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan

Soo eegista iyo qabsashada guryaha banaan ee 12 Holland Court iyo 120 Racecourse Road.

Holland Court meel fiican ayay wax u maraysaa

Dabaqyadii ugu dambeeyay ayaa hada la wadaa inagoona dhisayna guryo ka tiro badan kana tayo wanaagsan kuwii hore iyo goobo bulsho.

Aragtida farshaxanka ee guryaha cusub iyo meelaha barxadaha ah ayaa hada laga hirgalinayaa Holland Court.

Howlaha shaqo iyo xafadaha ka dhici doona Flemington

Waxaa laga yaabaa inaad aragto:

- Dadka goobta ku sugan oo xidhan dharka aad u muujinaya qofka
- Muddo kooban oo ay gudaha guryihii iyo waddooyinkii qaarkood laga maqli doono shanqar qeylo ah oo ay sababtay wax qodista
- Shanqar yar oo qeylo ah oo la maqli doono maadaama guryaha la faaruqiyay qaar la baari doono lana sugi doono

 Saacadaha caadiga ah ee shaqada ee Magaalada Moonee Valley waa:

Isniin ilaa Jimce
inta u dhaxaysa 7am iyo 6pm

Sabti
inta u dhaxaysa 9-ka subaxnimo iyo 3-da galabnimo

 Mararka qaar waxaa loo baahan doonaa fasax laga heysto golaha deegaanka si howlaha shaqo looga qabto saacadaha ka baxsan xilliyadaas balse waanu la socodsiiin doonaa dadka deegaanka haddii ay taasi dhacdo.



Wixii macluumaad
dheeraad ah oo ay ku
jiraan macluumaad ku
qoran lugadaada boogo:



**homes.vic.gov.au/precincts/
flemington-precinct**



Holland Court

-  Howlo dhisme ayaa ka socda gudaha deyrka badbaadada
-  Isku xirka bulaacadaha iyo biyaha ayaa ka socda Hill Street

Debneys Park



Hill Street

Gawaarida ma geli karaan howlo shaqo oo bulaacadaha awgeed waxaa dib loo furi doonaa dhammaadka bisha Ogosto

- Saacadaha shaqada ee la kordhiyey Axadaha 7-da subaxnimo ilaa 3-da galabnimo
- Kuwa baabuurta kala haga ayaa goobta ku sugnaan doona iyadoona ay jiri doonaan leeman wadooyinka ah oo la xiri doono iyo gawaarida waaweyn ee xamuulka oo isticmaali doona Holland Court

Hill Street

Victoria Street

Agagaarka xaafada

-  Qandaraaslayaasha iyo mas'uuliyiinta ayaa soo booqan doona goobta maalmo kala duwan si ay kormeeris u sameeyaan
-  Sahmin iyo kormeerid lagu sameynayo ciida ayaa meelaha qaar laga sameyn doonaa si loo xaqiijiyo in wax walba sugan yihiin



U diyaargarowga qaboojiyaha/ mukeyfka 2026

126 iyo 130 Racecourse Road

- ✂ Farsamayaqaano ayaa ku rakibi doona qalabka korontada dhisme kasta banaankiisa
- ✂ Beddelida qalabka korontada (emergency panels)



Kiraystayaasha ayaa hada dib-
u-dejin loo sameynaya

**12 Holland Court iyo
120 Racecourse Road**

Taageerada dib-u-dejinta ee la imaan karo bilaa ballan:

10-ka subaxnimo ilaa 4-ta galabnimo Talaado iyo Khamiis kasta

Xarunta dib-u-dejinta
33 Alfred Street
North Melbourne



Shaqo ayaa ka socon doonta gudaha dhismayaasha

-  Kormeeritaan ayaa lagu sameyn doonaa guryaha la faaruqiyay
-  Sugidda iyo samaynta guryo bannaan oo ammaan ah
-  Muunado yar oo shub ah oo laga gaadayo meelaha gaarkood

Jadwalka howlaha shaqo ee la qaban doono intaan wax la dumin

12 Holland Court iyo
120 Racecourse Road

 **Ogosto 2025**

- 1. Inaad wax badan ogaato oo ay waxkastana ammaan kuu ahaadaan**
 - ✓ Sugidda guryaha bannaan
 - ✓ Kormeerka goobta iyo dhismayaasha si loo maareeyo agabka si badbaado leh
 - ✓ Joogtaynta dayactirka joogtada ah

© Dabayaaqada 2025

- ## 2. Diyaargarowga

- Diyaarinta goobta iyo in calaamadaha meel kasta lagu dhajiyo si loo xaqiijiyo badbaadada
- Hubinta isku xirka adeegga
- Meesha laga galo in laga dhigo mid badbaado u ah dadka lugaynaya, baabuurta iyo baarkinka baabuurka
- Biraha laisku rakibo in la diyaariyo gudaha dhismahana shaqada laga bilaabo

 Horaanta 2026

- ### 3. Duminta

- In la dhameystiro biraha laisku rakibayo
- Waxa gudaha ku dhisan in lasoo saaro
- Dhismaha in loo dumiyo si taxadar leh oo marxaladaha kala duwan ah
- Si joogto ah in bulshada loola socodsiiyo wixii soo cusboonagada